



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
WADAJIR DISTRICT COURT
MOGADISHU-SOMALIA

Summad: MDWAD/939/2021

TR. 15/12/2021

UJEEDO:- SUGITAAN DHAXALCOOB, DAMMAANAD, TANAASUL XUQUUQ QISMI DHAXALEED, CADEYN TARIKO IYO WAKAALADO.

Maanta oo ay taariikhdu tahay 15/12/2021, Waxaa maxkamadda Degmada Wadajir Hor Yimid Markhaatiyaasha kala ah:-

- 1- **Axmed Cabdinuur Yuusuf**, Somali ah, Ku Dhashay Muqdisho Sanadkii 1976, Ina Faadumo Faarax Guureeye, oo sita baasaboorka.No.S00017465.
- 2- **Maxamed Maxamuud Maxamed Guureeye**, Somali ah, Ku Dhashay Hargela Sanadkii 1989, Ina Hindi Cismaan Xasan, Sita.basaaboorka.l.r.EP5241573.

Waxayna si Wadajir ah Maxkamadda Horteeda uga Caddeeyeen in u geeriyooday Marxuum la oran jiray **MARXUUM XASAN GUUREEYE KAARSHE**, Kuna Geeriyooday kenya 30.11. 1997, labadiisii waalid iyo mid ka mid ah xaasaskiisa wey ka geeri horeeyeen, ifkana waxuu uga tagay oo Dhaxlaya 2 Wiil iyo 2 Gabdhoo iyo hal xaas Waxayna Kala Yihiin

DADKA DHAXLAYA:-

1. **Muhubo Isse Nour** in Khadiijo Maxamed Faarax, ku dhalatay Itoobiya sanadkii 1966, Degan dalka Turkiga lehna Baasaboorka lambarkiisu yahay P01030959 -----**Xaaska Marxuumka.**
2. **Abdi Aziz Hasan Gureye** ina Muhubo Isse Nour, ku dhashay Nairobi sanadkii 1998 leh Baasaboorka Canadian ah lam.RG085053-----**Wiilka Marxuumka.**
3. **Abdirahman Hassan Gureye** ina Muhubo Isse Nour, ku dhashay Nairobi sanadkii 1995 leh Baasaboorka Soomaali ah lam.P00925487-----**Wiilka Marxuumka.**
4. **Asha Hassan Gureye** ina Asli Hussein Abdi, ku dhalatay Muqdisho sanadkii 1976 leh Baasaboorka lam. 522900611-----**Gabadha Marxuumka.**
5. **Saada Hassan Gureye** ina Asli Hussein Abdi, ku dhalatay Muqdisho sanadkii 1977 leh baasaboorka lam.521157519 -----**Gabadha Marxuumka.**

Waxay kaloo markhaatiyaashu caddeeyeen in aysan jirin Cid kale oo marxuumka dhaxleysa oo nool ama geeriyootay haday noqon laheyd asal ama farac.

HANTIDA LAGA DHAXLAAYO MARXUUMADA.

Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in **MARXUUM XASAN GUUREEYE KAARSHE** u ifka uga tagay Guri Dhisan oo ku yaal xamar Degmada (Hawlwadaag) Lehna W.L.DH.BB/5/33/2019 Tr.16/02/2019 iyo Rasiid No.07933/2019 Tr.16/02/2019 Kana Soo Wada Baxay D/hoose ee Muqdisho "Ahna Diplicate, Cabirkiisuna dhan yahay (13,50X13,50)-M lotto.l.r. (3122-) Soodimihisuna Kala yihiin Bari iyo Koofur Waxaa Ka Mara Jidad inta kalana Waxaa Ka Xiga Dhul dad.



SAWIRKA SUGAHA 1aad AHNA DAMIINULMAAL



AXMED CABDINUUR YUUSUF

SAWIRKA SUGAHA 2aad



MAXAMED MAXAMUUD MAXAMED GUREEYE

SAWIRKA WAKIILKA DHAXALTOOYADA AHNA DAMIINUMAALEKA



OSMAN GUUREEYE KAARSHE

TANAASUL QISMI DHAXALEED.

asha Hassan Gureye ina Asli Hussein Abdi, ku dhalatay Muqdisho sanadkii 1976 leh Soomaali ah lam.522900611, iyo **Saada Hassan Gureye** ina Asli Hussein Abdi, ku dhalatay Muqdisho sanadkii 1977 leh Soomaali ah lam.521157519, waxay ka tanaasuleen qismigii dhaxalka ay ku lahaayeen guriga tilmaamihiisu kor ku xusan yihiin sida ku cad Rep.0664/NC/2021 Tr.12.12.2021 kana soo baxday Nootaayo Caddaawe kuna saxiixan yaay Dr.Cabdulshakur Axmed Maxamed

DAMAANAD QAADKA DHAXALTOOYADA.

1. **Osman Gureye Karshe** hooyadiis la yiraahdo Faadumo Mahad Faarax, ku dhashay Garowe, sanadkii 1954, leh Baasaboora Soomaali Lam. P00553431.
2. **Axmed Cabdinuur Yuusuf**, Somali ah, Ku Dhashay G/kacyo Sanadkii 1976, Ina Faadumo Faarax Guureeye, oo sita baasaboorka.No.S00017465,

waxaan si Wadajir ah Maxkamadda uga hor caddeyneynaa in damiinnul buuxa ka nahay wax allaale wixii sharci duris ah ee ka yimaada dukumintiga guriga dhisan ee ku yaal xamar Degmada (Hawlwadaag) Lehna W.L.DH.BB/5/33/2019 Tr.16/02/2019 iyo Rasiid No.07933/2019 Tr.16/02/2019 kana soo wada baxay D/hoose ee Muqdisho "Ahna Diplicate", Cabirkiisuna dhan yahay (13,50X13,50)-M lotto.l.r. (3122-) soodimihisuna kala yihiin bari iyo koofur waxaa ka Mara jidad inta kalana waxaa ka xiga dhul dad, sida in dukuminti ah asal ah loola yimaado, iyo wixii ka soo laabta dhaxaltooyada reer **MARXUUM XASAN GUUREEYE KAARSHE**, waxaana ku damiinanay wixii hanti ah ee aan leenahay.

WAKAALADO

Waxay Maxkamadda Degmada Wadajir Sugaysaa In Dhammaan dhaxaltooyada oo Kala ah 1- **Muhubo Isse Nour**, 2- **Abdi Aziz Hasan Gureye**, 3- **Abdirahman Hassan Gureye**, ay Soo Wakiisheen Adeerkood **Osman Gureye Karshe** hooyadiis la yiraahdo Faadumo Mahad Faarax, ku dhashay Garowe, sanadkii 1954, leh Baasaboora Soomaali Lam. P00553431 Sida Ku Cad 1-)Wakaalad Ref NO. SOMEM/7042/2021 Tr.08/12/2021 Kana Soo Baxday kana soo baxday Safaaradda Jahmuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee Ankara Turkey uuna saxiixay xoghayaha safaaradda Ibrahim Cali Abshir, waxaana wakaaladaan soo xaqiijiyey Wasaarada Arimaha Dibadda ee D.F.Soomaaliya iyo Maxkamada Racfaanka ee Gobolka Banaadir, 2-)Wakaalad Gaar ah Rep.0662/NC/2021 Tr.04.12.2021 kana soo baxday Nootaayo Caddaawe kuna saxiixan yaay Dr.Cabdulshakur Axmed Maxamed, 3-)Wakaalad Gaar ah Rep.0661/NC/2021 Tr.04.12.2021 kana soo baxday Nootaayo Caddaawe kuna saxiixan yaay Dr.Cabdulshakur Axmed Maxamed.

Una soo wakiisheen dhamaantood in uu u maamuli karo, dhaxalkoob u samayn karo, gadi karo, Hibeyn Karo, Wareejin Karo, Qofkasta Qismigiisa Ku Wareejin Karo, Maxkamadaha dalka hortooda u matali karo qof waliba qismiga uu ku leeyahay gurigaas dhaxalka ah oo ay ka dhaxleen **MARXUUM XASAN GUUREEYE KAARSHE**



= SAXIIXA MARKHAATIYAASHA =

1- Axmed Cabdinuur Yuusuf (ahna damiinumaal) 2-) Maxamed Maxamuud Maxamed Guureeye

= SAXIIXA WAKIILKA DHAXALTOOYADA AHNA DAMIINUMAAL =
OSMAN GUREYE KARSHE

SUGITAANKA MAXKAMADDA.

Maxkamadda Markay aragtay Codsiga Wakiilka dhaxaltooyadda, Markay dhageysatay marag furka Markhaatiyaasha, markay aragtay dukumintiga Guriga ee ay MARXUUM XASAN GUUREEYE KAARSHE uu ku qoran yahay, Markay Aragtay Wakaaladaha, damaanadqaadka, Tanaasulka qismi dhaxaleedka sare ku xusan, Waxay Maxkamada Degmadda Wadajir sugeysaa geerida MARXUUM XASAN GUUREEYE KAARSHE, oo ay dhaxalkiisa leeyihiin dadka sare ku xusan oo kaliya, waxay kaloo Maxkamaddu sugeysaa in Osman Guureeye Kaarshe, uu Wakiil buuxa u yahay dhamaan dhaxaltooyada isla markaana uu awood buuxda u leeyahay ku tasarufka guriga ay ka dhaxleen MARXUUM XASAN GUUREEYE KAARSHE, ee sare ku xusan, Waana Sugitaan dhaxalkoob, Cadeyn Tariko taanaasul, damaanad qaad iyo Wakaalado ansax ah waafaqsan Sharciga Islaamka iyo qaanuunka dalka, Waxaana lagu qoray diiwaanka guud ee mucaamilaadka.

KAALIYAHA MAXKAMADDA.

C/risaaq Cali Cabdi "Caabi"

GARSOORAHA MAXKAMADDA DEGMADA WADAJIR

Dr. Axmed Maxamed Cali





UJEEDDO: TANAASUL

Maanta oo ay taariikhdu tahay 12/12/2021, aniga oo kala ah :-

1. **Saeda Hassan Gureye**, hooyadayna la yiraahdo Asli Xuseen Cabdi, ku dhalatay Muqdisho, sanadkii 1977, lehna baasaboorka lambarkiisu yahay 521157519 kana soo baxay dalka UK ee ku lifaaqan tanaasulkaan.
 2. **Asha Hassan Gureye**, hooyadayna la yiraahdo Asli Xuseen Cabdi, ku dhalatay Muqdisho, sanadkii 1976, lehna baasaboorka lambarkiisu yahay 522900611 kana soo baxay dalka UK ee ku lifaaqan tanaasulkaan.
- Anaga oo ka fiyow maskaxda cid nagu khasabtayna aysan jirin tanaasulkaan qowl iyo ficilba, waxaan qoraalkaan ku cadeynaynaa in aan ka tanaasulney qismigii dhaxalka Aabaheen Marxuum **Xasan Guureeye Kaarsbe**, oo ah guriga kuna yaala Xamar, Degmadda H/wadaag, gaar ahaan suuqa bakaaraha, cabirkiisuna yahay 13.5x13.5 lotta lam :3122, soohdintiisuna tahay Bari iyo koonfur waxaa ka mara jidad inta kale guryo dad, in uu gadi karo, waxaana maanta wixii ka danbeeya caddeyneynaa in aan wax dhaxal ah ku lehayn gurigaas.

SAXIIXA TANAASULAYAASHA

SAEDA HASSAN GUREYE

MOHAMED MOHAMUD GUREYE

ASHA HASSAN GUREYE

AHMED ABDINOR YUSUF

Rep.no. 0664/NC/2021


SUGITAANKA NOOTAAYAD

Tr. 12/12/2021

Aniga oo ah:- **Dr.Cabdulshakur Axmed Maxamed**, leh xafiisyo nootaayada Caddaawe, kuna yaala Xamar Degmada Halwadaag-Suuqa-bakaaraha, waxaan halkaan ku caddeynayaa in caddeynta tanaasulka ah ee kor ku xusan ay tahay mid sax ah, waafaqsan Shareecada Islaamka iyo shuruuca madaniga ah ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, ayna saxiixeen dhinacyada heshiisku khuseeyo. Nootaayaduna hubisay inay yihiin kuwii dhabta ahaa ee lahaa magacyadaas, islamarkaasna lagu qoray diiwaanka nootaayada.

NOOTAAYO

Dr:Cabdulshakur Axmed Maxamed



Addawe Public Notary
and legal service

Mogadishu-Somalia



مكتب عداوى لتوثيق العقود
والاستشارات القانونية
مقدشو-الصومال

UJEEDDO: WAKAALAD GAAR AH.

Maanta oo ay taariikhdu tahay 04/12/2021, aniga oo ah :- **Abdi Aziz Hasan Gureye**, hooyadayna la yiraahdo Muxubo Ciise Nuur, ku dhashay Nairobi-Kenya, sanadkii 1998, lehna baasaboorka lambarkiisu yahay **RG085053** kana soo baxay dalka Canada ee ku lifaaqan wakaaladaan.

aniga oo ka fiyow maskaxda cid igu khasabtayna aysan jirin wakaaladaan qowl iyo ficilba, waxaan qoraalkaan ku cadeynayaa in aan wakaalad gaar ah siiyay adeerkey **Osman Gureye Karshe**, Ina **Faadumo Mahad Faarax**, ku dhashay Garoowe sanadkii 1954 lehna baasaboorka lambarkiisu yahay **P00553431** kana soo baxay Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadaha Soomaaliya ee ku lifaaqan wakaaladdaan, waxaana u wakiishay qismiga dhaxalkii aan ku lahaa guriga uu ka geeriyooday Aabahay Marxuum **Xasan Guureeye Kaarshe**, kuna yaala Xamar, Degmadda H/wadaag, gaar ahaan suuqa bakaaraha, cabirkiisuna yahay 13.5x13.5 lotta lam :3122, soohdintiisuna tahay Bari iyo koonfur waxaa ka mara jidad inta kale guryo dad, wuxuuna aabahay Marxuum **Xasan Guureeye Kaarshe** ku milkiyay gurigaas W.M.L Risiid No :7933 Tr :16/02/2019, B/B/S No. 5/33/2019 Tr :16/02/2019 kana soo baxay Dawladda Hoose ee Muqdisho waaxda dhul (Duplicate). in uu gadi karo, heshiis ka gali karo, lacagta ii qaadi karo, dhisi karo, u dacwoon karo, dhaxal koob u samayn karo, iguna ma tali karo maxkamadaha hortooda uuna yahay wakiil idman.

Aniga oo ah:- **Osman Gureye Karshe** waxaan aqbalay wakaladaan Nootaayaha hortiisa aniga oo xor ah kana fayow xaga maskaxda cid igu khasabtayna aysan jirin wakaaladaan.

SAXIIXA WAKAALAD BIXIYHA
ABDI AZIZ HASAN GUREYE

SAXIIXA LAWAKIISHAHA
OSMAN GUREYE KARSHE

BASHIR MOHAMUD MOHAMED

MOWLID ABSHIR HASSAN

Rep.no. 0662/NC/2021

SUGITAANKA NOOTAAYAD

Tr. 04/12/2021

Aniga oo ah:- **Dr.Cabdulshakur Axmed Maxamed**, leh xafiisyo nootaayada Caddaawe, kuna yaala Xamar Degmada Halwadaag-Suuqa-bakaaraha, waxaan halkaan ku caddeynayaa in wakaaladda gaarka ah ee kor ku xusan ay tahay mid sax ah, waafaqsan Shareecada Islaamka iyo shuruucda madaniga ah ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, ayna saxiixeen dhinacyada heshiisku khuseeyo. Nootaayaduna hubisay inay yihiin kuwii dhabta ahaa ee lahaa magacyadaas, islamarkaasna lagu qoray diiwaanka nootaayada.

NOOTAAYO

Dr:Cabdulshakur Axmed Maxamed



ADDAWE PUBLIC NOTARY AND LEGAL SERVICE
TELL: 0612220077/619262627/615688881
Email: notayocaddawe@gmail.com

Saxiixa gofka baasboorka leh / Signet

FIIRO GAAR AH / OBSERVANT

SOMALI REPUBLIC

JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال

BAASBOOR جواز سفر PASSPORT

Antaxiinta Dabab / Country Code

SOM

S00017465



AHMED ABDINUR YUSUF
FADUMA FARAH GUREYE

NID: 27601013832602

CIVIL SERVANT

GALKAIO

01 Jan 1976

MALE

16 May 2017

15 May 2022

MOGADISHU

SOMALI GOVERNMENT

Saxiixa gofka baasboorka leh / Holder's Signature

Signature



L: 2676/2021

REF: SOMEM/7042/2021

Date: 08/12/2021

Ujeeddo: Wakaalad bixin

Anigoo ah **Muhubo Isse Nour** leh Baasaboer No: P01030959 Telefoon nambarkayguna yahay +905526432629 ahna Soomaali deggan dalka Turkiga gaar ahaan Magaalada Ankara waxaan wakaalad siinayaa walaalkay **Osman Gureye Karshe**, deggan Soomaaliya gaar ahaan Magaalada Muqdisho, leh Baasaboer No: P00553431, Telefoon No: +252907794047 in uu wakiil buuxa iiga yahay dhaxalka aan ka helo Ninkeyga Marxuum **Xasan Gaureeye Kaarshe**, in uu ii kireyn karo, rahan gelin karo kana saari karo, iibin karo iina saxeexi karo dhammaan dukumentiyada iiga khuseeya iibinta, uuna ku wareejin karo cidda iibsata, uuna Dacwoon karo.

Waxaana wakaaladan bixinay anigoo miyirkayga iyo maankayga qabna.

Wakaalad bixiso

Muhubo Isse Nour

Markhaatiyaal

1. Sakariye Huseen Ahmed
2. Hassan Hassan



Safaaradda Soomaaliya ee Ankara Turkiga, waxay Cadaynayaa in wakaalad bixiso **Muhubo Isse Nour** Safaaradda horteeda ku saxeexday wakaalada ay siisay **Osman Gureye Karshe** in uu wakiil buuxa uga yahay sida kor ku xusan.



Koglayaha Ibad
Abraham Ali Abshir



Handwritten signature and date: 08/12/2021



**DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
WAAXDA DHULKA**

No.: 7933

Soo Gelidda Warqadda

Tirsi :

Taariikh :

7933

16-2-2019



Bollettario No.:

Bolletta No. :

Sannadka :

5

33

2019

WARQADDA LAHAANSHAHA DHULKA

Mud / Mar.:

Xasan Guureeye Kaarshe

Og.: Tal. Ciidaanka Boliska Dawladda Hoose Muqdisho

- Xamar.

Mudanaha / Marwada kor ku qoran waxaa loo oggolaady inuu / iney dhisto Cariish, Baraako ama

Guri Dhagax ah

13-50

X

13-50

oo uu ka dhiso cad dhul ah oo

le'eg

Dejawa

kuna yaal Xaafadda

Hilwadiy

Soohdintiisuna tahay

3/2

X. Woqooyi

X, Galbeed

X, Bari

iyo Koofur

Warqaddaan xaq waxaad ugu leedahay muddo laba iyo toban (12) bilood ah oo maanta

Ka billaabmanta, fasax la'aan inaad dhulka dhistid.

Warqadda lacag qaabashada No.

7933

ee

16-2-2019

Muqdisho, Taariikh

16-2-

Agaasimaha Waaxda Dhulka



Duqa Magaalada



3254107 Duplicate H/Wadaf

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
WAAXDA DHULKA

13-50 x 13-50

h. 3/22

Xaashida lacag Qabashada No.: 7933

Mud / Mar. Xasan Ciireeye Kaarsho

Waxaan ka qabtay Sh. So. 23000 (laba Ms'7)

170 2 addis Boko / Kusa / 20

oo ah 1 Duplicate

Muqdisho 16-2-2019

B-Qofka Lacagta Bixiyay
T-Maamulka Lacagta
J-Nuqul ku haraya Boloogga



Saxiixa Lacag qabtaha